# Heshiisiinta kiiska mura-na da daryeelka khuseeya ee maxkamadda yaalla



Tuomioistuinvirasto
Domstolsverket

# Qoraalka waraaqda ku jira

Heshiisiinta waxaa lagu baddali karaa kiisaska maxkamadaha ee muddada qaadanaya....3

Faa'idooyinka Heshiisiinta....4

Heshiiska la xaqiijiyay wuxuu u dhigmaa go'aan maxkamadeed....4

Heshiisiintu waa nidaam qiimo ahaan jaban....5

Sidee ayuu qofku heshiisiinta u heli karaa?....5

Waxaa qoraalkan lagu diyaariyay Xafiiska fadhiyada maxkamadaha bishii maarso ee 2022.
Sawirada: Xafiiska fadhiyada maxkamadda iyo Bangiga sawirrada ee picjumbo



## Heshiisiinta waxaa lagu baddali karaa kiisaska maxkamadaha ee muddada qaadanaya

Heshiisiinta maxkamadda ee kiisaska muranada daryeelka ku saabsan waxaay baddal u yihiiin fadhiyada maxkamadda ee culus muddada dheerna qaadan kara. Adeegga heshiisiintu wuxuu gaar ahaan anfacaa waalidka kala tagaya marka adeegyada kale ee furiinku ay ku filnaan waayaan.

Heshiisiinta waxaa loo adeegsan karaa daryeelka ilmaha, deggenaanshaha, xuquuqda la kulanka iyo masruufka muranada waalidka ee la xidhiidha. Waxaa intaas dheer oo heshiisiinta lagu xallin karaa su’aalo badan oo ilmaha noloshiisa maalinlaha ah la xidhiidha oo aanan lagu falanqayn karin fadhiga maxkamadda. Hiigsiga heshiisiintu waa in la dhaliyo xal dan u ah ilmaha oo waalidka dhexdooda ku waaraya.

Heshiisiiyeyaashu waa qaadi ku tukhasusay arrimaha qoysaska iyo khabiir aqoon u leh waalidnimada iyo horumarka ilmaha, sida caadiga ah cilmu-nafsi yaqaan weeyaan ama shaqaalaha sooshalka. Qofka waalidka la shaqaynaya ee xirfadaha badan leh wuxuu ka taageerayaa waalidka xalinta dhibaatooyinka nafsiga ah iyo kuwa sharciga ah. Khabiirka waxaa loo adeegsanayaa in lagu hubiyo in heshiinta lagu falanqeeyo arrimaha ilmaha dantiisu ku jirto heshiiska la gaadhaana uu noqdo mid danta ilmaha waafaqsan.

Heshiisiintu waa mid si xor ah oo wadahadal ku salleysan loo qabanqaabinayo. Heshiisiintu waxaay guud ahaan hore ugu soconaysaa wadahadalka la yeelanayo ee wadajirka ah, laakiin hadii loo baahdo waxaay heshiisiiyeyaashu waalidka ula sheekaysan karaan gaar xattaa. Waalidka haddii lagala heshiiyo, heshiisiiyeyaashu waxaay sidoo kale la sheekaysan karaan ilmaha.

Waalidku waxaay heshiisiinta u adeegsan karaan caawiye sharci adeegiisa.

## Faa'idooyinka Heshiisiinta

Waalidka heshiiskoodu wuxuu horumarinayaa bad-qabka iyo ammaanka ilmaha iyo in ilmuhu uu xidhiidh wanaagsan la lahaan karoo labadiisa waalidba.

Heshiisiinta si degdeg ah ayaa loo heli karaa. Fadhiga heshiisiinta waxaa la qabanqaabinayaa lix toddobaad marka ay ka soo wareegto goorta la qaatay go'aanka bilaabista heshiisiinta.

Heshiisiintu waa nidaam ka degdeg badan kiiska oo maxkamadda lagu falanqeeyo. Heshiis waxaa lagu gaadhi karaa hal kulan oo kaliya xataa. Haddii ay sidaasi dhici waydanaya heshiisiinta waxaa hore loogu socon karaa si tartiib tartiib ah waxaana la gaadhi gadhaa heshiisyo muddo gaaban soconaya oo tijaabo ah.

Heshiisiintu khasab kuma aha qofka. In heshiisiinta la bilaabo waxaay ku xidhantahay oggolaanshaha labada waalidba, wuxuuna qofku joojin karaa heshiisiinta wakhti kasta oo uu ikhtiyaaro.

## Heshiiska la xaqiijiyay wuxuu u dhigmaa go'aan maxkamadeed

Heshiisiiyuhu wuxuu xaqiijin karaa heshiiska la xaqijiiyay. Heshiiska la xaqiijiyay wuxuu u dhigmaa go'aan maxkamadeed waana mid sidaas lagu fulin karo.



## Heshiisiintu waa nidaam qiimo ahaan jaban

Heshiisiinta marka uu qofku qaato waxaa laga qaadaa kharashka falanqaynta. Caawiyaha heshiisiinta ee ay degmadu magacowdo waalidka wuxuu u yahay lacag la'aan. Waalidka ayaa ka mas'uul ah mushaarka caawiyiha sharciga ee uu isagu qaato. Haddii waalidka loo oggolaado caawimaad sharci, kharashaadka caawiyaha sharciga waxaa laga bixinayaa qasnadda dowladda ama gabi ahaan ama qayb ahaan, haddi go'aan caawimaadda sharciga ah la gaadho.  Go'aanka caawimaadda sharciga waxaa laga codsadaa xafiiska caawimaadda sharciga.

## Sidee ayuu qofku heshiisiinta u heli karaa?

Heshiisiinta waxaa laga codsan karaa maxkamadda degmada ee uu ilmuhu degganyahay waxaana loo dirsan karaa codsi uu qofku qoran karo. Maxkamadaha degmooyinka qaar badan oo kamid ah waxaa laga heli karaa foomamka codsiyada oo diyaarsanba. Waalidku waxaay codsiga u sameysan karaan si wadajir ah ama kala jir ah. Codsiga waa in lagu sheegaa magacyada iyo macluumaadka xidhiidhka ee labada dhinac iyo sidoo kale arrimaha uu codsaduhu rabo in lagu xaliyo heshiisiinta iyo qoraal kooban oo lagu tilamaamayo arrinta laysku khilaafsanyahay. Haddii codsiga uu sameeyay waalidka mid ka mid ah oo kaligii ah, maxkamadda degmada ayaa ka waraysanaysa waalidka kale inuu oggolyahay heshiisiinta.

Waalidku waxaay codsan karaan heshiisiinta sidoo kale iyadoo kiiska maxkamaddu uu socdo. Haddii kiiska loo wareejiyo nidaamka heshiisiinta, fadhiga maxkamadda waxaa loo hakinayaa illaa inta heshiisiintu ay dhamaanayso.

tuomioistuinvirasto.fi | tuomioistuimet.fi

Tuomioistuinvirasto
Domstolsverket